



## Inuu nin weydiiyey Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: Islaamka maxaa ugu khayr badan? wuxuuna ugu jawaabay: "dadka oo aad unto siiso iyo inaad salaanto qofka aad taqaan iyo kan aadan aqoonba

Cabdullaahi Binu Camar -Allaha ka raalli ahaado isaga iyo Aabihiyeh- waxaa laga wariyey: Inuu nin weydiiyey Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: Islaamka maxaa ugu khayr badan? wuxuuna ugu jawaabay: "dadka oo aad unto siiso iyo inaad salaanto qofka aad taqaan iyo kan aadan aqoonba."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee -ayaa la weydiiyey, sifooyinka islaamka kuwee ugu fadli badan? wuxuu sheegay labo sifo: Mida 1aad: in la badiyo quudinta fuqarada, waxaana soo galaya sadaqa, hadiyada, soorida, casumida, waxayna sii fadli badan tahay quudintu waqtiyada ay jiraan abaarahay iyo sicir bararku. mida 2aad: waa inaad salaanto qof walba oo muslim ah kii aad taqaan iyo kii aadan aqoonba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5808>

